# ASTAAMAHA SIFOOYINKA AF SOOMAALIGA

## DHAQANKA, AQOONTA IYO FANKA

**Af Soomaaliga oo qornaa muddo gaaban darteed, iyo xogogaalnimada loo leeyahay dhismihiisa naxwe oo weli kooban, Warheyska Xiddigta Oktoobar isaga oo la kashanaya xafiisyada iyo aqoon-yahannada ku hawlan horumarinta iyo cilmiyeynta af Soomaaliga, wuxuu soo dhoweynayaa qofkii sameeya cilmi baaris arrinkan ku saabsan, wuxuuna ballanqaadayaa inuu qoraalladii wax ku ool ah ku faafiyo wargeyska, iyada oo looga dan leeyahay in halkan la isku dhaafsado doodo aqooneed oo xal u noqon kara dhibaatooyinka ka jira cilmiyeynta af Soomaaliga.**

**Maqaalkan oo ku saabsan dhibaatada sifada Soomaaliyeed wuxuu la xiriiraa arrimahaas. Waxaan rajeyneynaa in akhristayaashu jeclaystaan, fikradahoodana ka dhiibtaan ra'yiga qoraha maqaalka.**

Muddo dheer baa waxa socotay dood ku saabsan sifada Af Soomaaliga. Ilaa iyo hadda waxa leysku raacsan yahay inuu jiro micno sifo, waxaana leysku diiddan yahay qaabka naxwe ee sifada.

Arrintaas waxa ka jira laba fikradood oo iska soo horjeeda: tan hore, waxay leedahay waqti sifadu waxba kama duwana falka marba hadday, sida falka leedahay waqti iyo weji. Fikraddaas markeedii hore waxa lahaa C.R.V. Bell. Fekradda kale, ee taas ka soo horjeedda waxay ku doodeysaa in sifadu tahay qayb ka mid ah qaybaha hadalka, waxaana qaba fikraddaas Shire Jaamac. Laakiin Shire lama iman daliil burisa fikradda Bell, taasina waxay keentay in aragtida hore mudnaanta la siiyo.

Labadaas fikradood, halkay ka ahayd in ay baadi goobaan midnimada micnaha iyo qaabka sifada, way kala doorteen. Bell wuxuu u xagliyey xagga qaabka, Shirena xagga micnaha. Halkaas waxa ku luntay raadinta sababta dhalisay khilaafka. Sideedaba, khilaafaadka micnaha iyo qaabku maaha wax cusub ama u gaar ah afkeenna. Wuxuu ku fil yahay aqoonta luqadaha, afafka kala geddisnaa midba meel gaar ah ayuu ka soo ifbaxaa. Matalan,. falka Af Shiinihu ma laha waqti, weji iyo isrogrog, misana lama oran karo luqaddaasu ma laha fal. Af kastaa wuxuu leeyahay hannaan gaar ah oo xubnihiisi isu raacaan oo haddii aan la tixgelin lagu hodmo.

Culimada wax ka qora afkeenna, sida badan waxay adeegsadaan metodolojiyada isbarbar dhigga (comparative method). Metodkaasu wuxuu waxtar leeyahay marka lagu kabo aqoonta xeerarka gudaha (internal regulations) ee afka la dersayo, haddii kale wuxuu isu rogayaa mala'awaal ka fog xaqiiqada. Aad bay u adag tahayaqoonta dhismaha afka oo kaliya in lagu gaaro baaris run ah.

Mar kasta oo la doonayo in la derso af, waxa loo baahan yahay in la tixgeliyo arrimaha soo socda:

1. Qawaaniinta guud ee luqadaha ee ku dhisan (human logics).
2. Xeerarka u gaarka ah afka la dersayo.
3. Mowduuca laga hadlayo in aan laga dhex saarin kuwa kale ee uu la wadaago xiriir.

Aqoon-yahannada luqaduhu mar kasta ma ilaaliyaan qodobbadaas, gaar ahaan marka aysan macluumaad iyaga ka horreeyey oo mowduuca laga hadlayo ku saabsanaysan helin. Inta badan waxa jirta aqoonta ay u leeyihiin qaawaaniinta guud ee afafka, qaladaadka ay galaanna waa ka waxyeello badan yihiin kuwa ka dambeeya, dhaqsana looma garto.

1953kii ayey soo baxday fikradda oranaysa: sifadu waxba kama duwana falka, welina iyadaa laga shidaal qaataa marka laga hadlayo marfoolajiga af Soomaaliga. "Ulama jeedno fikraddaasu waa gabowday oo kèliya, balse waxaan uga gol leennahay maxaa loo arki waayey iska horimaadka ku jira fikraddaas? "... falalka astaanta..." Su'aashu waxay isugu soo biya shubanaysaa, ma jiraa fal wax sifeeyaa?

Buugga Bell "The Somali Language" wuxuu dhigayaa in "sifo la dhihi karo oo kaliya erayada ka yimaadda falalka astaanta (attributive verbs)". Falalka qoruhu sheegayaa waa: gaaban, yar, weyn, dheer, cusub, qabow, xun iwm. Bell sifada wuxuu raaciyey falka, gaar ahaan isrogrogga 4aad. Haddaba waxa isweydiin leh sifooyinka afkeennu miyey is wada rogaan? Maxaase ugu wacan arrintaas? Maxay uga geddisan yihiin sifooyinka afafka kale, maxayse la wadaagaan?

Su'aalahaas iyo kuwa kale ayaan uga jawaabi doonaa qoraalkan.

Kelmedaha tilmaan ka bixiya shey ama nafley ayaa la yiraahdaa sifo. Waana qayb ka mid ah qaybaha hadalka. Nin ladan, islaan basari ah, caano dhay ah, gogol wanaagsan, gabar quruxsan, hilib dheryodhuleysan. Erayada ladan, basari ah, dhay ah, quruxsan, wanaagsan iyo dheryo dhuleysan waxay noo tilmaamayaan astaamaha magacyada ka horreeya, sifaduna markaas magaca ayey gadaal ka xigtaa, umana baxdo lab iyo dheddig. Waxa la dhihi karaa: wiil quruxsan, gabar quruxsan ama nin buuran, islaan buuran...

Eraygu markuu keligii yahay ee uusan ku jirin tix, ma fududa in la garto qaybtuu ka tirsan yahay. Haddaan ka soo qaadno kelmedaha ku dhammaada lifaaqa-san in ay yihiin sifo, waxa dhici karta in aan qaldanno, waayo waxa jira kelmedo badan oo isla lifaaqaas ku dhammaada, sifana shaqo ku lahayn, sida: xambaarsan, ka tirsan, warsan, joogsan doonaa, waafaqsan, ka geddisan, ku saabsan iwm.

Waa Socotaa
W.Q.
Cabdullaahi Max'ed Shirwac

# MAXAAD KA TAQAAN INDHO-KUUSHA?

*Haweenka Soomaaliyeed waxay indho-kuusha isticmaalayeen muddo dheer waxayna la kowsatay waxyaabo fara badan oo xadaaraddu dadka bartay. Haweenka Soomaaliyeed isticmaalka indho-kuusha la wadaagan haweenka ku nool dunida Carabta, inta badan ujeedooyinka loo isticmaalana waxay ku kooban yihiin isku qurxin inkastoo ay jiraan ujeeddooyin kuwaa ka farcamay sida iyadoo loo isticmaalo dhiig joojinta iyo iyadoo la dagaallanta cudurka indhaha ku dhaca ee Bakoorada loo yaqaan iyo iyadoo la sheegay in haweenku ay ka helaan Suniyo dhaadheer.*

*Warbixinno laga diyaariyey baaritaanno dhawanta lagu sameeyey indhokuushan waxay sheegayaan in ay jiraan laba nooc oo indho-kuul ah.*

*Labada nooc ee indhokuusha ahi midi waa nooc hore oo ka iman jirey wadammada Carabta gaar ahaan Boqortooyada Sacuudiga, taas oo midabkeedu ahaa buluugga cawaawiga ah, waxaana baaritaanka lagu ogaday in haweenku aanu dhibaatooyin u geysan inkastoo aan sidii hore loo helin.*

*Midda labaad waa nooca casriga ah kaas oo haweenku si aad ah uga jecel yihiin kan hore waayo aad buu uga madow yahay, wuxuuna inooga yimaaddaa dalka Indiya, laakiin markii baritaan lagu sameeyey waxaa la ogaaday dhibaato xagga caafimaadka ah in uu leeyahay.*

*Noocan waxaa kù jira walax kiimiko ah oo afka qalaad lagu yiraahdo Led, taasoo dhiigga sumeysa haweenka uurka lehna ku sababta in ay dhiciyaan.*

*Dr. Maxamed Aslam, madaxa daawooyinka ee jaamacadda Notiham ayaa baaritaan uu muddo dheer waday ku ogaaday in indhokuushu ay sare u qaaddo heerkulka qofka, waxayna dhibaato u geysataa mandheerta iyo jiqida carruurta.*

*Waxay sidoo kale keentaa in marka ilmaha hooyadii indho-kuusha isticmaali jirtey dhasho lagu arko gariir iyo iyadoo ku keenta Yalaalugo iyo Matag dhibatana u geysata maskaxda ilmaha yar.*

*Waxaa kale oo Dr. Maxamed Aslam baaritaankiisa ku ogaaday in carruurta ay hooyooyinkood isticmaalaan indho-kuusha lagu arkay asaasaqnimo, xusullada maskaxda oo dabca uuna u ekaado sidii qof laleemo qaba iyo xuubka maskaxda oo barara.*

*Kooxda Norham oo iayana baaritaan ku sameysay indho-kuusha gaar ahaan noocan Indiya inooga yimaadda waxay caddeeyeen in ay dhibaato ku timaaddo ilmaha ay hooyooyinkood isticmalaan indho-kuusha, waxayna si aada ugu walwaleen dhibaatada ay indho-kuushu u geysato haweenka isticmaala laf ahaantooda gaar ahaan kuwa xagga indhaha oo keliya gaar ahaan dhibatada ku timaadda cadka indhaha.*

*Baaritaan kale oo indhokuusha iyo siyaabaha kala duwan ee loo isticmaalo wax looga ogaanayey oo ay sameeyaan Ururka haweenka Madow oo saldhiggiisu London yahay waxay ogaadeen in haweenku ay indho-kuusha qurux ahaan u isticmalaan e aaney garaneyn dhibaatooyinka caafimaad ee ay leedahay.*

*Sababta keen tay in noocan dambe aad loo isticmaalo waxay ururku ku tilmaameen in helitaankeedu ka fudud yahay nooca hore, xagga qiimahana uu aad uga jaban yahay.*

*Ururku waxa uu ammaanay haweenka joojiyey isticmaalka indho-kuusha kaddib markii ay ogaadeen dhibaatooyinka caafimaad ee ay leedahay.*

*Guud ahaan baareyaashu waxay si aad ah uga dayriyeen isticmaalka indhokuusha gaar ahaan noocan Indiya laga soo dhoofiyo.*

**W.Q.**
**Cabdi Guuleed Cilmi "Age"**

## *WARGELIN*

**Akhristayaasha sharafta leh ee sida wacan ula socdey maqaalaadkii taxanaha ahaa kuna saabsanaa taarikhda Soomaaliyeed oo cinwaankeedu ahaa "Soomaaliya iyo Waayadii Dhagaxa" oo uu qori jirey Saclid Bakar Mukhtaar uguna soo bixi jirey bogga 3aad maalin kasta oo maanta oo kale waxaan ku wargelineynaa in uu qoruhu joojiyey inta lagu jiro bisha barakeysan ee Ramadaan, waxaana dib idinku soo sheegi doonnaa mar kale waqtiga uu bilaabi doono.**

DHAQANKA, AQOONTA IYO FANKA

## SHEEKO GAABAN

# SAAXIIBADDEY DARTEED...!

QAYBTII 5aad

— Waan kuu sheegayaa laakiin waxaan kaa codsanayaa haddii ay qofkaas kuugu noqoto kedis in aadan ka nixin ama aanad iga caroon!.

— Calwaan... maxaa kugu khasbey inaad sidaas u hadasho?... aniga miyaa ka naxaya ama ka caroonayo haddii aan garto gabadha aad guursaneysid... ii sheeg waatee gabadhaas?

— Gabadhaas waad garaneysaa waxaa la yiraahdaa... Fowsiya... Xaaji... Cabdisamad... waa adiga...!.

— War sidee alla kuu galay aniga miyaad i soo gashay adigoo ka war qabin xaaladda aan ku suganahay?

— Walashey ayaan ku weydiiyey oo si tafaasiil ah iigu kaa sheegtay markaan ka codsaday in ay wakiil iga noqoto oo ay ii soo kaa doonto waxay ii sheegtay in aad wada socotaan wiil aad is rabtaan waxayna iga codsatay inaan mar dambe arrintaas ku soo qaadin.

— Ilaah baa mahad leh, haddiiba walaashaa runta kuu sheegtay oo ay markhaati ii noqotay.

— In kasta oo ay walaashey runta iiga kaa sheegtay haddana intaas kuma qanacsani waayo qof si sharci ah loo mehersaday ilaa haatan ma tihid, sidaas darteedna tartanku waa uu furan yahay saaxib bey leedahay oo keliya ma kuugu dhaafayo!

— Calwaan aniga walaalkey oo kale ayaad ii tahay igana xishoon meysid miyaa? Wiil ay is rabaan ayey isla socdaan haddii walaashaa ku tiri miyeysan kuugu filneyn? Maxaa kuugu dhacay?.

— Waxba iguma dhicin in guur leys isweydiistaana ceeb maaha ogowna in guurku calaf yahay... adigu ma hubtaa wiilka aad sheegeyso inaad is guursan doontaan?

— Waan ku rajo weyn nahay haddii Eebbe aqbalo.

— Haddaba haddii ay arrintu tahay sidaas rajada maxaad iga reebeysaa?

— Waa lagaa soo horreeyey.

— Marka hore bal ii sheeg wiilka aad is rabtaan shaqadiisu maxay tahay?.

— Waa arday dhawaan soo qalin jebin doona.

— Oo goormaad is guursaneysaan?

— Markii uu shaqo bilaabo ayaan is guursaneynaa.

Calwaan inta hadalkaas ku qosley si jees jees ahna u eegey Fowsiya ayuu yiri: si kasta arrintu ha haato, aniga waxaan kuu soo bandhigayaa barnaamijka aan wato oggolaataa iyo diiddaba: waad ka warqabtaa shirkadda aan u shaqeeyo heshiiska aan la galay inuu yahay toban sano oo la cusbooneysiin karo, waxay isiiyaan heshiiba lacag dhan (....) qeybna waan keydsada qeybna waan isticmaalnaa... goobta shidaalka laga qodo ayey shirkaddu naga siisay guryo aan degno gaari iyo dayuurado helikobtar ahna wey noo joogaan oo shirkaddaa gaar u ah, haddii aad iga aqbasho inaan ku guursado waalidiintaada aad baan uga farxin doonaa adigana sidaad doontid ayaan kuu yeeli doonaa, marka aan is mehersanno halka aan ka shaqeeyo ayaan ku aqal geli doonnaa in kasta oo aan jecelahay inaan deg deg isku mehersanno si aan Viso kuugu diro shirkadda aan ka shaqeeyo si ay uga soo dhammeyso dalkaas aan aadeyno, barnaamijkaas ayaan wataa - maxaad iga oran lahayd Fowsiya?.



Markii hore Fowsiya su'aashaas ma ay maqleyn oo waxay ku mashquulsaneyd qeybta hore ee barnaamijka Calwaan iyo is barbarreyn shaqada Calwaan iyo tan uu geli doono saaxibkeed Cabdiweli, markii uu Calwaan isla su'aashii ugu soo celiyey ayey soo baraarugtey dabadeedna iyadoo yaabban ugu war celisay: uma fileyn muddaddii yareyd oo aad joogtey inaad sidaas iiga fekereysid oo aad go'aan degdeg ah iiga gaareysid, arrintaan waxaan kaa dhihi lahaa adigoo ku mahadsan sida aad ii qadderisay mar hore ayaan ballan ka qaadey wiilka aan kuu sheegayey, ballantaas ma jebin karo sidaas darteedna waad iga raalli ahaaneysaa adigoon iga caroon wax xumaato ahna u qaadan go'aankeyga.

Calwaan inta ka naxay hadalkaas ayuu yiri: waxaan kuugula talin lahaa inaadan dantaada ballan aan la hubin uga tegin kolleytaba wiilka aad sheegeyso igama wanaagsanee, mar kale ayaana kaa codsanayaa inaad arrinkeyga iga aqbashid... ka feker fursad kale ayaan ku siinayaa?.

LA SOCO ARBACA.

W.Q.
*Aweys Xuseen (Shiino)*

# ASTAAMAHA SIFOOYINKA AF SOOMAALIGA

(QAYBTII 2aad

Sida badan, waxa dhacda isla hal erey inuu metelo dhowr qayb hadal. Sida erayadan: Geesi, deeqsi, nacas, doqon, baarri, basari, fulay, macangeg, bikro, waddani iyo kuwo kale oo badan. Erayadaasu waa sifo. Inkastoy galaan kaalinta magaca, misana mar kasta micnahoodu wuxuu tilmaamayaa tayo qof leeyahay, waxaana ka sii farcama magacyo cillan (abstract nouns), marka gadaal laga raaciyo lifaaqa-nnimo (geesinnimo, deeqsinnimo, nacasnimo, baarrinimo iwm).

Haddaba si loo kala garto sifo iyo magac, midkay yihiin, aan eegno tusaalaha soo socda:

**Magac**

Axmed wuxuu guursaday **gaari.**
**Geesi** ayaa na badbaadiyey.
Martida waxa sooray **deeqsi.**
**Nacas** Rabbi wax kuuguma daro.

**Sifo**

Axmed wuxuu guursaday gabar **gaari ah.**
Nin **geesi ah** ayaa na badbaadiyey.
Martida waxa sooray nin **deeqsi ah.**
Ruux **nacas ah** Rabbi wax kuuguma daro.

Erayada geesi, deeqsi, gaari iyo nacas markay yihiin magaca, ah ma raacdo, laakiin, markay yihiin sifo waxa hareeraha ka kala mara magac iyo ah. Sideedaba, ah waxay gadaal ka martaa sifo ama magac ku jira kaalin sifo.

Sifooyinka noocaas ah isma rogrogaan, micnahooda iyo qaabkooduna isma diiddana. Waxaase jirta in wadartoodu u samaysanto sida magaca, taasina waxay ku iman kartaa iyagoo markoodii hore magac ahaa, ka dibna isu rogay sifo.

**Keli**

Ruux deeqsi ah
Islaan gaari ah
Nin geesi ah
Wiil nacas ah

**Wadar**

Rag deeqsiyaal ah
Haween gaariyo ah
Niman geesiyaal ah
Wiilal nacasyo ah

Waxa jira sifooyin kuwan ka duwan.

Marka laga hadlayo xagga dhismaha sifooyinku, waxay u kala baxaan qaar gadaal lifaaq ka raaco iyo kuwo aan lifaaq wadan. Sifooyinka ka dhasha magaca iyo falku waxay leeyiin lifaaq, kuwa salkoodu la mid yahay sifaduna ma laha lifaaq.

QAYBTII 2aad

I Sifooyinka ka farcama magaca

| Magac | Lifaaq | Sifo |
|---|---|---|
| Wanaag | -san | wanaagsan |
| Hab | -san | habsan |
| Dhiillo | -aysan | dhiillaysan |
| Gaajo | -aysan | gaajaysan |
| Qurux | -san/oon | qurxoon |
| Qurun | -moon | qurmoon |
| Been | -aale/low | beenlow |
| Run | -low | runlow |
| Indho | -ole | indhoole |
| Dhego | -ole | dhegoole |

II Sifooyinka ka farcama falka.

| Fal amarka 1 | Fal amarka 2 | Lifaaq | Sifo |
|---|---|---|---|
| Dub | dubo | -an | duban |
| Shiil | shiilo | -an | shiilan |
| Qor | qoro | -an | qoran |
| Jimeysan/Jimee | jimeyso | -an | jimaysan |
| Samee | samayso | -an | samaysan |
| Qiimee | qiimayso | -an | qiimaysan |
| Buuxi | buuxso | -an | buuxsan |
| Faafi | faafso | -an | faafsan |
| Dhaari | dhaarso | -an | dhaarsan |

Labada fal amar waxaan u soo qaadannay, si aan loogu malaym in fal amar kastaa uu leeyahay sifo u gaar ah. Sifada DUBAN nooma sheegayso sabjaga (falaha): kala garanmayno ma wax ruux naftiisa u dubtay baa, mise waa wax uu cid kale u dubay. Sidaas daraadeed, sifaha duban, labada fal amar waa u dhexdhexaad (neutral).

Waa Socotaa
W.Q.

C/laahi Max'ed Shirwac

DHAQANKA, AQOONTA IYO FANKA

## *SHEEKO GAABAN*

# SAAXIIBADDEY DARTEED...!

**QAYBTII 6aad**

Intey cabbaar aamustey Fowsiya ayey tiri: runtii wiilka aan sheegayo kaama wanaagsana, anigana marna kuma fekerin Calwaan ayaa wanaagsan iyo wiilkaas ayaa wanaagsan balse waxaan qadderinayaa inuu kaa soo horreeyey oo aan horta intaa is baraney ballan mustaqbal dhiganney. Haddii ay jirto in aan nin guursanayana kolleytaba isagaan guursan doonaa oo isagaan ballan ka qaadey.

Calwaan idagoo quusasho ka muuqato ayuu yiri: waan kuu jeedaa inaad si madax adkeysiineysid balse waxaan kaa codsanayaa inaad keyd igu qorto si haddii aad is afgaran weysaan aan u noqdo qofka koowaad!

Fowsiya iyadoo hadalkaas nicbeysaneysa ayey tiri: Ilaah noma qaddero aniga iyo wiilkaas inaan is afgaran weyno oo aan kala tagno ama ballanta isaga baxno.

Iyada oo uu Calwaan la yaabban yahay mowqifka Fowsiya iyo sida lama filaan ay ku noqotay... Fowsiyana la yaabban tahay arrinta Calwaan ku kediyey, labadooduna ay ka fekerayaan raadka mid kasta oo ka mid ah kan kale ku reebay ayaa waxaa u soo galay Fellis oo dhowr bac alaabo raashin u badan ku wadata, Fowsiya ayeyna ka codsatay in ay kala geliso armaajooyinka iyo qaboojiyaha weyn, iyaduna waxay ku dhaqaaqday hawlo kale oo guriga u bahnaa.

Cashadii ayaa leysku soo raacey gaarigii Calwaan wadey ayaa la soo raacey, waxaana la yimid caweyska Jubba si looga casheeyo.

Labada gabdhood imaashada caweyskaas waxay u ahayd markii ugu horreysey oo ay soo galaan caweyskaas iyadoo ay habeen tahay marka laga reebo waqtiyo maalin ah oo ay baarka sharaab ka soo doonan jireen iyagoo xeebta dheer ee badda yimid.

Laakin Calwaan inta uusan waxbarashada dibedda u aadin ayuu xaweyska habeen iyo maalin mararka qaarkood imaan jirey.

Intii la casheynayey waxaa miyuusig ka tumayey caweyska kooxda Durdur oo uu Calwaan la yaabey si aad ahna ula dhacay markuu arkey in ay ku heesayaan heeso af Ingiriis ah oo aqoon-yahanno Soomaaliyeed curiyeen oo caalami ah kuna sabsan yihiin qaarkood qadiyadda dhaqdhaqaaqa gobannimadoonka Afrikaanka ee ka socda Koonfurta Afrika.

Iyadoo cashadii laga fara xashay Calwaanna uu sheekeynaayo ayaa waxaa soo galay caweyskii Cabdiweli oo la socda macallimiintiisii Faransiiska ahaa oo la taliyayaasha ka ahaa buugga baarista uu ku qalin jebin lahaa iyagoo iska soo raacey guriga macallin ka mid ah macallimiintaas kaddib markii ay isugu yimideen ka hadlidda cutubyo ka mid ah baarista Cabdiweli, dabadeedna macallinkii gurigiisa leysugu yimid ku taliyey in ay ka soo casheeyaan baarka weyn ee Jubba.

Markii ay Cabdiweli iyo macallimiintiisii ag marayeen miiskuu ay fadhiyeen Calwaan iyo gabdhaha la socdey ayaa iftiinkii leydhka miyuusigga ee saalada ciyaarta ku dhacay Cabdiweli waxaana atkey Fellis oo durbadiiba gacanta ka qabatay iyadoo salaameyso!

Cabdiweli markuu arkay Fellis salaan ayuu ku boobay iyada iyo intii la fadhiday, waxaase naxdin iyo lama filaan ku noqotay Fowsiya oo dhex fadhida Fellis iyo wiil kale oo uusan aqoon balse uu u maleeyey Fellis walaalkeed.

Cabdiweli isagoo walaacsan ayaa Fellis bartey wiilka la fadhiya una sheegtay inuu yahay walaalkeed Calwaan oo isagu muddo dheer maqnaa; walaalkeedna waxay u sheegtay inuu Cabdiweli yahay wiil ay macruuf yihiin si wanaagsanna isu yaqaanniin.

Wiilashii markii ay barasho wanaagsan iyo ahlan wasahlan is-yiraahdeen cabbaarna ereyo aan isbarashada ka fogeyn is weydaarsadeen Cabdiweli intuu cudur daartey ayuu durbadiiba ag fariistay macallimiintiisii.

Fowsiya iyadu naxdin ay ka naxday aragtida Cabdiweli awgeed lalabo ayaa



qabatey sharaabkii ay cabbeyseyna wey iska sikisay in yar inteysan jooginna Fellis ayey u sheegtay in ay hunqaaci rabto, dabadeedna suuliga ayey isku soo raaceen halkaasoo Fowsiya ku hunqaacdey cashadii macaaned ee ay cuntey.

Taas Calwaan wuxuu u qaatey in Fowsiya aaney horey u aqoon ka casheynta baararka waaweyn - markii ay gabdhuhu u soo noqdeenna Fowsiya ayuu kula kaftamay: waxaan u maleynayaa inaadan jeclayn cunista raashinkaan, waxaanse kuu wacayaa arrosto iyo rooti, kuwaas ayaad garaneysaa cunistooda!.

Fowsiya iyadoo isu muujineysa qof xanuunsan ayey tiri: weligey kalluun waan cuni jirey mana hunqaaci jirin ee caawa anigaa si kale iska ah - ixsaan ii sameeya gurigii ha la ii kaxeeyo.

Fowsiya markii gurigeeda la keeney iyadoo naxsan, waxaa u sii kordhay cabsi iyo welwel, waxayna bilowday in ay ka fekerto waxa ay kala kulmi doonto cabdiweli mar haddii ay amarkiisa jebisay dadkii uu uga digeyna ay raacdey.

Miisaankii ayaa ka lumay kaddib markii ay garan weysay meel ay talo ka billowdo; oo maxay ku jawaabi haddii uu weydiiyo sababtii ay ugu tagtey Fellis iyo walaalkeed Calwaan? Waa ay ka warqabtaa in uu Cabdiweli yahay wiil madax adag oo cadkuu qabsado goosanayo.

Sidey u qancin laheyd markuu sabab kasta ay sheegto ka maqli waayo?, waayo wey ogtahay in Cabdiweli uusan go'aan gaarin isagoon si aad iyo aad ah u dersin waxa uu go'aanka ka gaarayo, mar haddii ay amarkiisii jebisay waa ay ka warqabtaa ugu yaraan in ay Cabdiweli ka filaneyso cirdeyn iyo canaan lagu kala tago.

Waxay dib ugu noqotay xusuusteeda waxaana ku soo dhacay ereyadeedii ahaa (waxa noo dhexeeyo waa innagoo is ixtiraamno been iyo khiyaanana iska dhowrno, haddii ay arrimahaas nala soo dersaanna waa maalintii aan kala dhimaneyney).

Waxay ka murugootay ilbiriqsiyada Cabdiweli ay hortaagnaan doonto markuu soo xusuusiyo ballantaas iyo sidey markaas noqon doonto, waxay eed dusha uga tuurtay saaxiibteed Fellis iyo walaalkeed Calwaan.

Waxay murugo u deris aheyd Fowsiya ilaa laga gaaro habeenkii ay ballanta la lahayd Cabdiweli, gurigeedana waxay ka soo baxdey iyadoo aan welwel u dhineyn intii cabsi jirteyna wadnaheedu uusan xamili karin maskaxdeedana ay ka fekereyso oo kaliya: Cabdiweli ma ku saamixi doonaa mise waa uu ku ceyrin doonaa?.

Waxay soo caga jiiddaba waqtigii caadiga u ahaa ballantooda ayey timid gurigii - albaabkii markey garaacdeyna isagaa ka furay.

**Waa Socotaa**
**W.Q.**
**Aweys Xuseen "Shiino'**

# ASTAAMAHA SIFOOyinka AF SOOMAALIGA

**QEYBTII 4aad**

Jumlada (3) ee mustaqbalka iyana sifadu waa doorsoontay. Bal aan eegno lifaaqa -aan wuxuu soo kordhiyey. Laba micno midkood buu yeelan karaa: Cali wuxuu noqon doonaa dherer ama Cali waxa u kordhi doona dherer. Labada jeer midna ma sheegato micno sifo. Halkeedii waxa galay magac iyo ma jare korriimo. Laakiin; markaan soo qaadanno Cali waa dheeraan doonaa oo meelaha qaar looga hadlo, micnaha sifadu ma lumayo. **Cali waa dheeraan doonaa; waxay ka dhigan tahay; Cali wuxuu ahaan doonaa nin dheer. Laakiin waxa loo baahan yahay in lifaaqa -aa aan lagu daldin lifaaqii -aa ee tagtada. Markaan ma tilmaamayo waqti. Waqtiga waxa noo sheegaya DOONAA.**

**Sidaas daraadeed, lifaaqa -aa ee mustaqbalku wuxuu sugayaa semantikada sifada, halka lifaaqa -aan uu ka maldahayo.**

Lifaaqa -aa ee gadaal ka raaca sifada waqtiga la soo dhaafay, **wuxuu ka soo go'ay fal kalkaaliyaha** AHAA. Halkii isaga oo dhami ku qormi lahaa sifada, ayaa waxa ku darsamay alankiisa dambe oo keliya. Sidaas ayeyna ku dhashaan lifaaqyada (-aa, -eyd, -ayn, -deen, -yeen) ee sifooyinka gadaal uga qorma. Arrimaha soo socda ayaana daliil u ah:

I. Jumlada marka uusan ku jirin fal, sifadu kama maaranto fal kalkaaliye.

II. Jumlada markuu la socdo fal, sifadu isma doorsoo. Tusaale:

Waxan iibsaday buug cusub.
Wuxu cabbay biyo kulul.
Dugsiga waxa ila dhigta gabdho qurquruxsan.

III. Ahaa iyo lifaaqa -aa ee tagtadu waxay tilmaamayaan astaamo naxwe oo isku mid ah.

IV. Meelaha qaar sifada iyo fal kalkaaliyaha waa leysku akhriyaa.

a) Wa qurxoon yahay
-waa qurxoon-yay
Waa qurxoon tahay
-waa qurxoon-tay
Wey wanaagsan yihiin
-wey wanaagsan-yiin.

Fal kalkaaliyaha xarafka ugu horreeya iyo alanka ugu dambeeya ayaa leysku qaadaa oo lagu buuxiyaa sifada.

b) Wejiga 1aad ee kelida ah markuu iska hadlayo, sida badan sifada waxa ku qorma fal kalkaaliyaha: anigu waan qurxoonahay, qaawanahay, gaabanahay, yarahay iwm.

Tagtadu waa ka duwan tahay joogtada.

**Waa Socotaa**
**W.Q.**
**C/llaahi Maxamed Shirwac**

**DHAQANKA, AQOONTA IYO FANKA**

# Dhibaatooyinka Mukhaadaraadka

## Halista Isticmaalka Mukhaadaraadka

Taariikhaha adduunka haddii dib loo raaco waxa jiri jirtey in mukhaadaraadka la yiqiinay, ha ku kala duwanaadeen jaadad ahaan iyo waqti ahaanbee. Hadday ugu sahlanaato waxay ugu isticmali jireen dabiibidda iyo yareynta xanuunnada. Hase yeeshee qaar ka mid ah adduunweynaha wuxuu ku noqday aafo markey u isticmaaleen mirqaankooda. Waxay ka soo bilaabantay dalabka ku xeeran Badda Cad ee Afrikada iyo Aasiyada ka tirsan. Ka dibna aafadii waxay u sinqatay dalalka: Hindiya, Shiinaha, Yurubta qaarkood, Mareykanka Waqooyi ilaa iyo ay ka gaadho Mareykanka koonfureed (D.P. AUSUBEL, Durug Addiction, Random House, New York, 1966, p. 57).

Guud ahaan qaadashada maan-dooriyayaasha kala duwan (sida xashiishadda, afyoonka iyo wuxuu dhalo, kuwa dubabka keena, kiniinada waxna soo jeediya waxna seexiya iwm, ee qaataha gaadhsiiya heer ka-maarmi-waa) waxay sida daacuunka ku fideen adduunka qaybtii dambe ee qarnigan labaatanaad, siiba dalka Mareykanka, dalalka Laatiin Ameerika iyo Yurubta Galbeed. Haddaynu si gaar ah u soo qadanno dalka Mareykanka waxa halista uu mukhaadaraadku ku hayo inoo qayaxaya qodobbadan:

1. Jaadad kala duwan oo mukhaadaraad ah oy dadku isticmaalaan iyo kuwo cusub joogto ahaan suuqyada u soo gala. Ka soo qaad xashiishadda oy ugu yeeraan "Marijuwana, Afyon" iyo kuwa laga sameeyo gaar ahaan "Mrfiinta" oo la isku mudo iyo "Herwiinta" oo siyaabo dhowr ah loo qaato (sanka oo laga ursado, markay heerkaas dhaaftana la isku duro, iyo ugu dambeysta oo la gubo, qiiqa ka soo baxana laga qaato sanka iyo afkaba-). Waxa laga yaqaan dalka Mareykanka maan-dooriyayaal fara badan sida kuwa buuxinaya kaalintii afyoonka iyo qabiilkiisa lana yiraahdo "Meperidine iyo Methadone" oo asal ahaan loogu isticmaalay daaweyn, waxa iyaguna ku badan kiniinada "Nembutal iyo Seconal" oo ku abtirsada "Barbiturates" iyo kuwa loo yaqaan "Benzedrine, kokayiin, iyo kan Surucyada ee la yiraahdo, L.S.D., intaas waxa u sii dheer jaad dhawaan soo bax ah oy carruurta iyo dhallinyarada sin.dheertu (Ten Age) barteen waana muudsashada xabagta ama dib-u-neefsashadeeda (Gulf Sniffing).

2. Korodhsiimada xad-dhaafka ah ee dadka isticmaalaya mukhaadaraadka. Halista ugu weynina aanay ahayn xashiishadda ee afyonka wixii la mid ahaa si argagax leh ummadda Mareykanka ugu fidayaan. Taasoo laga garan karo sida ay dawladdu sannadahan dambe uga sii dayso raadiyaha, jaraa'idka iyo telefishankaba.

3. Haddaynu dib ugu noqonno warbixinadii laga baahiyey kororsiimada joogtada ah ee weliba dadka uu la tegey mukhaadaraadku, sannadadii kontomeeyadii waxa lagu qaddaray in ay boqolkiiba lixdan (60%) ahaayeen dhallinyaro (21-30 sano jir ah). Lixdamaadyadiina ayba intaas ka sii da' yaraayeen dadka sida ba'an ugu soo biiray qaadashada mukhaadaraadka, hase yeeshee tirada dhediggu aad ayey ugu yarayd, dabeedna iyaga naftoodii ayaa si la yaab leh xerada mukhaadaraadka ugu soo qulqulay.

Haddaba marba marka ka dambeeya waxa la isku dayo in tiro-koob lagu sameeyo dadka uu jiitay maan-dooriyuhu waxa laga helaa cusbitaallada inay tirada soo gashaa kor u sii socoto si gaar ahaan ah dhallinyarada iyo xataa carruur da'doodu aad u yar tahay, kuwaas oo gaadhay heerka ka-maarmiwaaga (Addiction).

Magaalada "Shikaago" baritaan lagu sameeyey waxa ka soo baxay; saddex meelood marka loo dhigo dadka uu mukhaadaraadku dishooday meel ahaan (1/3) in ay da'doodu ka yar tahay kow iyo labaatan sano (Drug addiction among young persons in Chicago, a Report of a study inducted by Illinois Institute for Juvenile Research and Chicago area project). Halistaasi oo kale waxay gaadhay Laatiin Ameerika, ha ugu sii darraado dalka Meksiko oo si aan caqligal ahayn loogu beero xashiishadda.

Dr. Sacad Al-Maqribi (Masar) wuxuu ka soo guuriyey aqoon-yahankii reer Arjantiin "Wolf" (buuggiisii qaadashada xashiishadda), tira-koob iyo dhacdooyin rasmi ahi waxay qayaxeen in ay dalka Meksiko ku fiday ka ganacsiga iyo cabidda ama isticmaalka mukhaadaraadka. Waxa taas marag u ah in ay Boliska Mareykanka qaarkood qabtaan kumaankun Kg. oo xashiishad ah, cid kaleba daayoo beeraleyda yaryar waxa laga helaa boqollaal kg. oo ay iskood u beertaan. Mr. Wolf wuxuu intaas ku daray, inkastoy dalalka Laatiin Ameerika Badidood caan ku yihiin mukhaadaraadka, haddana dalka Meksiko waa ka sii xag jiraa, waana dhuunta mukhaadaraadku u maraan dalka Mareykanka (gaar ahaan xashiishadda) ee soohdintooda loo mariyo, sannad walbana qaddar aan yarayn lagu qabto. Mana aha keliya mukhaadaraadka loo diyaariyo isticmaalka ee waxa looga gudbiyaa iniinyaha loogu talo galo beeritaanka, halkaas oo ay dad badani ku beeraan guryahooda.

Waa Socotaa

W.Q.
I.M. SACMAAL

# ASTAAMAHA SIFOOYINKA AF SOOMAALIGA

**QAYBTII 5aad**

c) Tagtada fal kalkaaliyaha alanka ugu dambeeya ayaa gadaal ka raaca sifada. Tusaale:

gaaban -gaabnaa
dheer -dheeraa
weyn -weynaa
yar -yaraa
fudud -fududaa.

Waxa kaloo iyana jira falal (irregular verbs) ku qorma fal kalkaaliyaha laga hadlayo oo sida sifada isu beddela, waxaana ka mid ah:

**Joogto**
Ogyahay
Jecel yahay
Taagan yahay
Oggol yahay
Diiddan yahay
Neceb yahay
Xambaarsan yahay

**Tagto**
og +aa -ogaa
jecel+aa -jeclaa
taagan+aa -taagnaa
oggol+aa -oggolaa
diiddan+aa diiddanaa
neceb+aa -necbaa
xambaarsan+aa -xambaarsanaa.

Af soomaaliga waxa isku darsama qaybo badan. Taasi waa arrin u baahan tixgelin gaar ah marka laga hadlayo morfolojiyada afka. Waxa jira erayo loo tiriyo qayb hadal oo aan gooni isu taagin, laakiin micnahoodu uu jiro. Isku daranka qaybaha hadalka iyo astaamahooda uma hayno meel, mowduuca aan ka hadlaynana maaha. Sidaas daraadeed, kuma sii fogaaneyno; waxaase ka mid ah qaybaha isku qorma:

1. ~~Wiil~~, magaca iyo qodobka -wiil +ka -wiilka
2. Magac, qodob iyo tilmaame: guri +ga +kaas -gurigaas.
3. Sifo iyo fal kalkaaliye: gaaban +ahay -gaabnahay
4. Fal iyo fal kalkaaliye: taagan +ahay -taagnahay
5. Magac u yaal iyo tilmaame: kuwo +kan -kuwakan
6. Magac gaar ah ~~iyo~~ iyo suge: Cali +baa -Calaa yimid iyo kk.

Isku darsanka qaybaha hadalku waa ka geddisan yahay lammaanayaasha. Micnaha qaybaha isku qormaa iskuma milmaan. Micnaha qayb kastaa gooni ayuu u taagan yahay. Haddaan soo qaadanno gurigaas oo ka kooban magac (guri), qodob (ga) iyo tilmaame (kaas) oo markuu ku qormayo magac ay ugu dambeeyaan (g) iyo (h) lumiya (k), waxaan heleynaa saddex micno oo kala metelaya qaybaha ereygu ka koobmo. Magacu wuxuu noo sheegayaa shey (guri), qodobkuna in gurigu yahay mid aan naqaan, tilmaamuhuna wuxuu noo sheegayaa intuu gurigu noo jiro. Isku darsanka sifada iyo fal kalkaaliyuhuna wuxuu ka soo jeedaa xeerkaas. Qodobka, lahaanshaha iyo tilmaamuhu keligood isma taagaan, had iyo jeer waxay ka raaracaan magaca, (tilmaamayaashu markay gooni isu taagaan waa magac u yaallo). Qodobku wuxuu kaalin ka ciyaaraa isku qormidda magaca iyo tilmaamaha.

Haddaba isku qormidda sifada iyo fal kalkaaliyuhu kama baxsana xeerka aan kor hadda ku soo sheegnay. Fal kalkaaliyuhu markuu sifada ku qormo kuma soo kordhiyo micno cusub, mana dooriyo micnaha sifada. Wuxuu ku soo kordhiyaa qaab naxwe (waqti, weji, dheddig iyo lab iyo tiro). Astaamahaasina waa kuwuu hore u lahaa fal kalkaaliyuhu.

Waxa kaloon ogsoonahay in qaybaha isku darsama tan dhammaadka erayga xigtaa mas'uul ka tahay isbeddelka naxwe. Sidaas daraadeed, sifadu isma beddesho ee waxa isbeddela fal kalkaaliyaha ama alan isaga ka soo go'ay. Marka meesha fal kalkaaliyaha ~~ka~~ laga dhigo fal sifadu isma beddelayo.

Sidaas awgeed, khilaafka ku kala dhex jira micnaha iyo qaabka sifada waxa keenay isku darsanka ee maaha wax ka yimid sifada.

**Heerka jimaynta**

Sifadu waxay leedahay saddex heer jimayn.

Heerka 1: wuxuu tilmaama astaan shey ama nafley, wuxuuna la mid yahay sifada caadiga ah. Tusaale; Caasha waa gabar quruxsan.

Heerka 2: wuxuu isbarbar dhigaa laba wax ama laba cid. Tusaale; Caasha waa ka quruxsan tahay Timiro.

Heerka 3: wuxuu isbarbar dhigaa hal qof ama shey iyo wax ka badan. Caasha ayaa ugu quruxsan hablaha dugsiga. Waxa kaloo la dhihi karaa: Caasha waxay ugu qurux badan tahay gabdhaha dugsiga. Waxa kale oo dhici karta in la helo gabar kale oo xagga quruxda Caasha ka sidata, isla markaas iyadoo maanka lagu hayo in Caasho xagga quruxda dugsiga ugu sidato. Markaas heerka jimayntu wuxuu noqonayaa sidan: Caasha waxa ka sii quruxsan ama ka sii qurux badan Luula, oo markaas Luula ay ku soo baxdo boqoraddii quruxda ee dugsiga.

Heerka jimaynta waxa noo sheegaya gurubyada kala ah: ka + sifo, ka + magac + badan, ugu + sifo, ka sii + sifo, ka sii + magac + badan...

**DHAMMAAD**
**C/laahi Maxamed Shirwac**